

Dad dheeraad ah oo u qalma caawimaad

Laga bilaabo **Luulyo 1, 2022**, dad dheeraad ah ayaa u qalma faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) oo buuxa iyo taageerooyinka iyo adeegyada Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyada oo aan loo eegayn xaalada muhaajirnimo.

Cidmaa u qalanta?

Adeegyada ODDS

- **Dhammaan dadka** buuxiya u qalmida I/DD waxay awoodi doonaan in ay helaan adeegyada maamulka kiiska.
- Dadka da'doodu tahay **19-25** ama **55 jir iyo ka weyn** ee buuxiya dakhliga iyo shuruudaha u qalmida ayaa sidoo kale heli kara adeegyada iyo taageerooyinka ODDS:
 - Adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan sida caawimaada qubeyska, lebisashada, wax cunista, gaadiidka iyo waxyaabo badan
 - Adeegyada shaqada
 - Tiknoolajiyada la adeegsado

Wixii adeegyo ah, la xiriir Barnaamijka Naafanimada Koriinka ee Bulshada ee degaankaaga:

 <https://go.usa.gov/xJmt4>

Faa'iidooyinka OHP

Dadka nool Oregon ee:

- Buuxiyaha shuruudaha dakhliga u yaala iyo waxyaalaha kale oo la iskaga baahan yahay
- Da'doodu tahay **25 sano jir iyo ka yar** ama **55 sano jir iyo ka weyn**.

Macluumaad dheeraad ah:

 Oregon.gov/HealthierOregon

 **1-800-699-9075**



Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.